

Waalidku waa ilaha carruurtu ka hesho aqoonta

**Qoraalkani wuxuu kuu sheegayaa sida aad u caawin karto
carruurta markay akhrinta ku adkaato**

Somaliska





Tusmada Qoraalka

Hordhac	3
Waa maxay dhibaatooyinka la xiriira akhrinta iyo qorista?	4
Waa maxay disleksi (dyslexi)?	6
In goor hore la garto calaamadaha	9
Sida iskuulka goor hore gacan uga geysan karo in laga hortago dhibaataada	10
Adiga waalid ahaan waxa aad sameyn karto	12
Warbixin dheeraad ah	18

Hordhac

Qoraalkaan waxa loogu talo galay waalidka ay carruurtoodu iskuulka kol dhow bilowday. Ulajeeddada qoraalkani waa in la fahmo carruurta ay haysato dhibaatooyinka la xiriiira qoraalka, akhrinta iyo disleksiyada (dyslexi) isla markaana aynu muujinno muhimadda ay leedahay in goor hore la caawiyoy ilmaha halgan ugu jira barashada wax akhrinta iyo wax qorista.

Waxaa qoraalkaan soo saaray Louise Belfrage iyo Suzanne Heimdal. Labadayaduba waxaan leenahay carruur qaba disleksi (dyslexia), kolkaa waxaynu ognahay sida ay u adagtahay in la helo caawimaadda iyo warbixinta loo baahan yahay. Markuu waalidku doonayo inuu caawiyoy carruurtiisa wuxuu isweydiiyaa su'aalo badan oo ay ka mid yihiin: Sidee baan ku ogaankaraa waxa ilmaheynu qabo? Maxaan sameynkaraa? Maxaa ilmaheyna ku habboon?

Waxaynu rajayneynaa in qoraalkaan uu noqdo mid waxtar weyn kuu leh oo aad ka sii taabba qaadikarto. Kaasoo aad ka helikarto talooyin, warbixinno iyo aqoon asaasi ah oo aan fileyno inay kuu noqdaan kuwo waxtar leh si aad u caawiso carruurtaada.

Waxaa la aaminsan yahay in carruurta badankood ay bartaan wax akhriska ayadoo aan loo eegin habka waxbarasho ee laga isticmaalo iskuulka. Laakiin waxaa jira in carruurta qaar ka mid ah ay ku adkaato barashada wax qorista iyo wax akhrinta marka la barbardhigo carruurta kale. Sidaasi inay dhacdana waxaa ka danbeeya sababo badan, hase yeeshee taas macnaheedu ma aha in carruurtaasi ay haraan balse waa in ay helaan caawimaadda ay u baahan yihiin, ayadoo la eegayo xaaladdooda shaqsi ahaaneed, si ay asaagooda ula socdaan.

Iskuulku wuxuu xanbaarsan yahay mas'uuliyadda ah in ilmahu barto akhrinta iyo qorista, waalidkuna wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado in ilmihiiisu helaan waxbarsho tayo leh. Waalidku laftiisu waa awoodda ka caawinkarta carruurta siday u hormarin lahaayeen qoraalka iyo akhrinta. Waxaa arrin faa'ido leh ah in goor hore wada shaqeyn dhaxmarto ilmaha, waalidka iyo macallinka si ilmuhu u gaaro natiijo wanaagsan.

Waa maxay dhibaatooyinka la xiriira akhrinta iyo qorista?

Waxaa jira sababo badan oo keenaya in dadku ay dhib ku noqonkarto inay akhriyaan waxa qoran.

Qaar ka mid ah sababaha keeni kara dhibaatooyinka la xiriirta wax akhrinta iyo wax qorista :

Disleksi (dyslexi) oo ah nooc khaas ah ee keena in qofku ku adkaato akhrinta iyo qoraalka, taana ay la xiriirto abuurista Ilaahey oo looga jeedo in qofku uu ku dhashay.

Dhugyeelasho la'aan ama isku taxalujin la'aan (fudeyd)

waxay keentaa in qofku uusan ka fiirsan, taana sababto in akhrinta iyo qoristaba ay adkaadaan.

Waxbarasho liidatada ama tayo xun waxay keeni kartaa in carruurta aysan si fiican u baran akhrinta.

Sababo kale ayaa iyaguna jira oo keena in qofku ku adkaato qorista iyo akhriska, sida carruurta oo intay xannaanada dhiganayaan aan la dhiirigalinin kobcinta afkooda, inuusan qofku caado ka dhigan wax akhriska, aqoonta afka iswiidhishka oo yar taasoo ay sabab u tahay in qofku afkiisa hooyo uusan aheyn iswiidhish. Waxaa dhici karta in sababo badan oo iskaashaday ay keenaan in qofku ku adkaato akhrinta iyo qorista, sida in ilmahii oo qaba disleksi, ay u weheliso in afkooda hooyo uusan iswidhish ahayn.



Tirada waxa qoran waa sii kordhayaa

Wagtigaan aynu joogno muhimmadda qoraalku leeyahay waa mid uusan lahaan jirin waagii hore. 20-30 kii sano ee ugu danbeeyay waxaa aad u sii kordhayay waajibaadka inooga imaanaya dhanka iskuulka iyo bulshada, kaasoo ah inaan yeelanno awood wax akhrin iyo wax qoris, taasna waxaa daliil u ah sida warbixinnada qoran maalin kasta naloogu soo diro.

Laakiin haddeynu eegno dhinaca kale waxaynu aragnaa in awooddeena wax akhrinta dabiiciga ah ama abuurista Ilaahey ah inaysan isbadelin sida ay isku badashay waajibaadka iskuulka iyo bulshada inooga imaanaya.

Waagii hore waxaa suurtoagal ahayd in qofku helo shaqo aan si fiican in wax loo akhriinkaro ama loo qorikaro aysan muhiim ahayn, maantase taasi suurtoagal ma aha. Sidaas darteed ayay muhiim u tahay in qofku inta uu yaryahay helo fursad iyo rabitaan inuu wax akhrinta barto. Runtiina waxaa loo baahan yahay inuu qofku saacado badan wax akhriyo si uu u noqdo qof ku wanaagsan wax akhrinta.

Ugu danbeyntii waxaan oran karnaa in qiyaastii 25 % shacabka dalkaan Iswiidhan aysan la qabsankarin bulshada ay ku nool yihiin oo ah bulsho ku dhisan warbixin isku gudbinta, markaana ay muhiim tahay in qofku wax akhriyo, waxna qoro.

Waa maxay disleksi (dyslexi)?

Disleksi waa nooc khaas ah ee ka mid ah dhibaatooyinka la xiriira akhriska iyo qorista oo adkaada, waa dhibaato luqadeed ee la xiriirta sida qofku Ilaahey u abuuray, shaqana kuma laha caqliga ama maskaxda qofka. Waxaa lagu tiriyaa carruurta isku da' da ah in 5-8 % ay qabaan disleksi. Waxayna aad ugu badan tahay wiilasha marka loo eego gabdhaha, waana adagtahay in la ogaado gabdhaha qaba disleksi, waayo gabdhuhu badanaa waa kuwo adaab badan isla markaana aamusan, halka wilasha la maqlo oo ay ismuujiyaan, lana dareemo.

Carruurta qaba disleksi waxaa dhibaya kuna adag inuu wax aqriyo waxna qoro, balse barashada waxyaabaha kale aad bay ugu fududahay. Carruurtaas maskaxdooda iyo hal abuurkooda wuxuu bannaanka ugu soo baxayaa siyaabo kale ee aan ahayn qorista, taasoo loola jeedo in si walba carruurta wax u baran karaan aan ka ahayn qorista.

Disleksi ma aha cudur mana jirto daryeel caafimaad oo baabi'inaya sida daawo, ookiyaale khaas ah ama nafaqo gaar ah. Disleksiyada ma aha mid la xiriirta caajisnimo ama arag iyo maqal xumi. Waxaan og nahay in ay jirto fikrad adag oo sheegaysa inay dhaxal ku timaaddo - markaa waxaa iska dhaxla qoysaska.

Kala duwanaanshaha dadka

Dadka oo dhan way kala duwan yihiin. Waxaynu ku kala duwanahay dhererka, buurnida, waxaynu leenahay gacmo iyo suulal kala duwan iwm. Sidaas oo kale ayay maskaxdeenuna u kala duwan tahay. Kala duwanaanshahaas maskaxdeena qeybta khuseysa luqadaha waxay keeneysaa in dadku siyaabo kala duwan uu u barto wax akhrinta iyo wax qorista. Qorista iyo akhrintuba waa howl culus oo ka kooban qeybo badan, waxaana xusid mudan in dadka badankiis ay leeyihiin awoodda wax akhrinta iyo wax qorista.



Codku waa sida dhismo oo kale

Qofka markuu hadlayo, waxaan maqlaynaa dhawaaqyo sida hirkii oo kale ah. Codadkaas ayaa loo baahan yahay in aan fahamno oo aan xarfo u beddelno markaan wax qoreyno amaba akhrinayno. Cilmibaarayaasha badankood waxay sheegaan in dadka qabaa disleksiyada dhibaatada heysato ay tahay, inuu si sax ah u garto dhawaaqa soo baxaya marka la hadlo, oo waxaa u kala duwanaanayso dhawaaqa ereyada qofku uu sheegayo iyo kay iyagu maqleen ama u qaateen inuu yahay. Markaa micnihii dhawaaqa adiga aad sheegtay iyo kuu qofku fahmay ayaa kala duwanaanaya. Sida la ogyahayna garashada dhawaaqyada xarfaha waxay shardi muhiim ah u tahay siduu qofku u noqon lahaa mid ku fiican wax akhriska iyo wax qorista.

Haddii carruurta kala saari karaan dhawaaqyada xarfaha, waa qasab inay gartaan, tusaale ahaan, inay maqleen xarfaha "a" marka lagu dhawaaqo ereyga "bad" amase ay gartaan in ereyada "bad" iyo "dad" ay isku dhawaaq ku dhammaadaan. Carruurtaas waxaa la yiraahdaa waxay leeyihiin awood fiican ee garashada codadka xarfaha, balse kan disleksiyada qabaa aad bay u liidataa awooddaas garashada dhawaaqyada xarfaha. Ilmaha disleksiyada qabaa ma kala saari karo codadka xarfaha, oo waxaa ku adag inay gartaan ereyga dhawaaqyada iyo codadka uu ka kooban yahay iyadoo aysan dhegaha dhib ka qabin. Markaa waxaa ku adag inuu isku qabto xarfihi iyo dhawaaqoodii, taasna waxay keeneyso in aysan helin furihii akhrinta. Sidaas darteed carruurta disleksi qaba waxay u baahan yihiin hab gooni ah oo ku tababaraya siday dhawaaqa iyo xarfaha isugu qaban lahaayeen, si ay akhrintu ugu fududaato.

Calaamadaha lagu garto disleksiyada

Carruurta disleksiyada qaba waxaa caadi ahaan ku adag waxyaabaha soo socda:

- **Garashada dhawaaqa ereyada** – waxaa ku adag inay gartaan dhawaaqa ereyga ay maqleen, xarfaha ay yihiin iyo sidey dhawaaqyada u kala horreeyaan.
- **Dib u garashada ereyga** – waxaa caadi ah in qofku uu si dhib yari ah u garto erey uu mar hore arkay laakiin ilmaha qaba disleksiyada waxaa ku adag inay si fudud ama si dhaqso leh u akhriyaan ereyga qoran oo ay hore u soo arkeen. Carruurta qaba disleksiyada waxay badanaa ereyga u aqriyaan xaraf xaraf sidii inuu ku cusub yahay oo kale.
- **Isticmaalka ereyada** – waxaa ku adag inuu si degdeg ah ku sheego ereyga saxda ah marka la weydiiyo tusaale ahaan ”maxaa la yiraahdaa magaca Madaxkutiga cad ee ku nool jasiiradda Greenland”. Taasna waxaa ugu wacan aqoontiisa erayada uu luqadda ka yaqaan oo aad u hooseeya.
- **Higgaadinta** – waxaa ku adag kuna ah dhibaato weyn inuu higgaadiyo ereyga.
- **Xusuusta** – waxaa ku adag inuu maskaxda wax ku hayo, isagoo ku mashquulsan howl kale. Tusaale ahaan inuu xusuusto waxa uu saaxiibkiis leeyahay inta uu asaguna buug ka raadsanayo boorsadiisa.
- **Qoraal ku cabirid wuxuu rabay** – waxaa ku adag inuu fikradiisa iyo wuxuu doonayay uu ku soo gudbiyo qoraal ahaan, halka uu awood fiican u leeyahay inuu si afka ah uga sheego wuxuu doonayay.

Disleksiyadu kaligeed iskama baaba’eyso, laakiin haddii la helo tababar sax ah, loona qaabilo si hufan isla markaa la helo qalab waxbarasho ku habboon waxaa carruurta disleksiyada qaba lagu dhaweynkaraa heer la mid ah kuwa kale ee aan disleksiyada qabin.

In goor hore la garto calaamadaha

Waxaa suurtoagal ah in goor hore, xitaa ka hor iskuul bilaabidda, la ogaado carruurta khatar ugu jirta inay ku adkaato barashada wax akhrinta iyo qorista iyo disleksiyada. Waxaa mudan in fiiro gaar ah la siiyo carruurta aan daneyn ereyada isku dhawaaqa ah ama isku qaafiyadda ah, aan danaynayn xarfaha alfabeetada ama aan danayn inay ciyaar ka dhigtaan ereyada markay carruurta yar yar yihiin.

Qaar ka mid ah calaamadaha ugu horreeya ee mudan in fiiro gaar ah la siiyo, gaar ahaan da'da carruurta ku jirto dugsiga hoose waxay la xiriiraan akhrinta. Laakiin waxaa kaloo jiri kara oo loo baahan yahay in aan muhimadda siinno waxyaalo kale ee la xiriira carruurta hab u dhaqankooda sida:

- In ilmaha aysan daneyn xarfaha, ereyada iyo buuggaagta.
- In barashada wax akhrinta iyo wax qorista ay tartiib ku socoto marka la barbardhigo ardayda kale.
- In markuu akhrinayo uu qoraalka u akhriyo si shigshigid leh, hakad badan ama tartiibi ay ku jirto.
- In badanaa uu isku qaldo akhrinta ereyada qoraal ahaan isku dhaw.
- Wuxuu dhibaato kala kulmaa akhriska ama xallinta xisaabaha qoraal ahaan loogu dhiibay.
- Wuxuu si qaldan u higgadiiyaa ereyada, taasoo uu ka tago xarfo ama ka boodo.
- Waxaa muuqata inuu si ka hooseysa awooddiisa uu wax u qabto.
- Wuxuu noqdaa mid xanaaq badan, murugeysan isla markaana ah mid ay isku kalsoonidiisa hooseyso.
- Waxaa ku adag inuu feejignaado.
- Wuxuu isku mashquuliyaa waxyaabo kale si uu uga baxsado wax akhriska ama wax qorista.

Qaar ka mid ah carruurta ay heysato dhibaataada wax akhrin la'aanta ama wax qoris la'aanta waxay qabi karaan dhibaatooyin kale ee waxbarashada ku saabsan tusaale ahaan:

- Waxaa ku adag inay kala gartaan bidix iyo midig
- Waxaa ku adag inay bartaan saacadda ama waqtiga
- Waxaa ku adag xusuusta ama inay raacaan tilmaan la siiyay

Sida iskuulka goor hore gacan uga geysan karo in laga hortago dhibaataada

Carruurta waxay aad ugu baahan yihiin dadka waaweyn oo la socda, fahmayana xaaladda ay ku sugan yihiin, isla markaana si wadajir ah wax ula qabanaya. Wada shaqeyn wanaagsan ee dhax marta iskuulka iyo waalidkana waxay waxtar aad u weyn u leedahay xasiloonaada carruurta markay joogaan guriga ama iskuulka.

Cilmi baarayaashu waxay si xooggan u sheegaan muhimmadda ay leedahay in goor hore la bilaabo dadaalka lagu doonayo in carruurta bartaan wax akhriska iyo qorista, taasoo saamayn ballaaran ku yeelanaysa natiijada carruurta badankeed gaarayaan.

Waxaa kaloo xaqiiqo ah in tayada waxbarashada iskuulka ay door weyn ka ciyaari karto barashada wax akhriska ama qorista. Sidoo kale waxaa muhiin ah khibradda macallinku leeyahay iyo heerka aqoontiisa. Sidaas darteed waxaa lama huraan ah in arday walba la siiyo waqti ku filan iyo macallin caawiya si loo gaarsiiyo horumar fiican ee dhanka wax akhriska iyo qorista. Waxaana waajib ah in iskuul walba laga helo macallin takhasus gaar ah u leh baridda wax akhriska iyo qorista ee khuseeya carruurta qabta disleksiyada.

Gargaarka ku habboon

Carruurta ay heysato dhibaato la xiriirta wax akhriska iyo wax qorista dhammaantood waxay xaq u leeyihiin inay helaan gargaarka ay u baahan yihiin, ayadoo aan lagu xujeyn baaritaan khaas ah ee sugaya jiritaanka dhibkaas. Haddii adiga waalidka ah aad ka welwelsan tahay sida carruurtaadu ku yihiin wax akhriska ama wax qorista, waxaa habboon inaad la xiriirto macallinka fasalka u dhiga, isla markaana aad ka codsato in baaritaan lagu sameeyo. Sidaas haddii aad sameysana ma aha micnaheedu in carruurta lagaa takoorayo ee taas waxay suuragalineysaa in sida ugu dhaqsiiyaha badan u helaan mucaawanaada ku habboon xaaladdooda. Sabab waliba dhibaataadaasi salka ha ku haysee, waa in si sax ah carruurta loo caawiyo.



Baaritaanka ugu horreeya waxaa sameynkara macallin arrimahaas u leh aqoon iyo khibrad gaar ah. Mararka qaarkood waxaa loo baahdaa in la sameeyo baaritaan ama qiimeyn ballaaran oo uu sameeyo ama ay wada sameeyaan dhakhtarta aqoonta u leh codadka iyo hadalka (logoped) iyo takhtarka cilmi nafsiga (psykolog), waayo baaritaanka ay sameeyaan koox taqasus gaar ah leh waa mid aad u wanaagsan.

Qorshe waxqabasho

Qorshaha waxqabasho waa dukumenti qoran oo qeexaya sida wax loogu qabanayo carruurta dhibaataadu heysato. Dukumentigaas waxaa diyaariya iskuulka ayadoo mar walba lala tashanayo ilmaha iyo waalidkood.

Maamulaha iskuulka ayaa mas' uul ka ah in carruurta u baahan mucaawano khaas ah uu u sameeyo qorshahaas wax looga qabanayo baahidooda gaarka ah.

Qorshaha waxqabasho waa inuu ku dhisan yahay wixii ka soo baxay baaritaankii la sameeyay. Si ay ardaydu u gartaan una arkaan wixii horumar ah ee ay sameeyeen, waxaa muhiim ah in qorshahaasi noqdo mid qeexan oo ay ku caddahay ujeeddoyinka la doonayo in lagu gaaro muddo gaaban iyo muddo dheerba.

Si loo ogaado in talooyinkii la soo jeediyay ay dhaliyeen natiijooyinkii la rajeynayay waxaa lagama maarmaan ah in dukumentiga la qortay dib u raac lagu sameeyo mar kasta. Waxaa habboon in lagu heshiiyo waqtiga la kulmayo iyo qof walba mas' uuliyadda ka saaran in heshiiska la fuliyo ilaa iyo intii laga kulmayo kulanka xiga.

Carruurta waxay u baahan yihiin in la fahmo, isla markaana dadka waaweyn ay ku qaabilaan carruurta si caadi ah oo qalbi furnaan leh. In la ammaano ama la dhiirigaliyo carruurta waa shardi muhiim u ah si heshiiska loo fuliyo, natiijo wax ku ool ahna looga gaaro tallaabooyinka la qorsheystay.

Adiga waalid ahaan waxa aad sameyn karto

Waalidku carruurtiisa siyaabo kala duwan buu u caawin karaa. Xaqiiqdii waxa aad adigu sameynkarto waxa ay ku xiran tahay hadba dhibaatada uu qabo ilmahaaga iyo sida uu iskuulku ku yahay. Halkaan hoose waxaa ku xusan dhawr fikradood.

U oggolow carruurta inay hadlaan oo kuu warramaan

Carruurta waa ay ogyihiin waxa dhibaya ama ku adag, badanaana si fiican bay u qeexi karaan dhibka heysta haddii la siiyo waqti fiican oo ay ku hadlaan. Haddaba waalid ahaan isku day inaad garato waxa uu ilmahaagu u baahan yahay in laga caawiyo. Ogowna in wada hadal ku dhisan isku kalsooni dhaxdiina ah uu aad iyo aad u anfacyo carruurta. Hana hilmaamin in ilmahaagu ay waxyaalo badan ku fiican yihiin. Xusuusina in adiga xitaa ay jiraan waxyaalo aad ku fiican tahay iyo waxyaalo aad ku liidato. Una sheeg in dadkoo dhama ay sidaas yihiin.

Xooji oo sare u qaad kalsoonida carruurta

Waa shardi muhiim in carruurta isku kalsoon yihiin si ay u yeeshaan rabitaan isla markaana guul ka gaaraan waxbarashadooda. Mar walba ammaan ilmahaaga intii aad dhaleeceyn laheyd. Aaminidda qofku ku qabo inuu barankaro waxyaabo adag waxay saameyn fiican ku leedahay kalsoonida. Barashada waxyaalaha adag ee carruurta la soo gudboonaadana waa barashada alfabeetada, qorista ereyada, weeraha iyo akhriska buugaagta. Carruurta sida caadiga ah waxay is barbardhigaan saaxibadood fasalka la dhigata, waxayna isla markiiba dareemayaan inaysan la qabsankarin.

Inta lagu jiro gaarista hadafka ah in carruurta laga caawiyo barashada wax akhriska iyo wax qorista, ma aha inaynu hilmaamno in carruurta ay helaan waqti ay sameeyaan waxyaalo kale ee ka baxsan waxbarashada iskuulka. Waa muhiim inay helaan waqti ay ku ciyaaraan, ay ku sameeyaan waxay jecelyihiin ama kula kulmaan saaxibadood. Ku dhiirigeli in ilmahaagu yeeshaan howlo kale oo ay dareemayaan inay guul fiican ka gaarikaaran, waayo waxyaalahaas oo kale waxay kor u qaadayaan kalsoonidooda.



Ku ciyaarsii carruurta barashada luqadda

Waxaa jira xiriir ka dhaxeeya horumarinta luqadda carruurta, iskuulka ka hor iyo ka dib marka carruurta si fiican u barato wax akhriska iyo wax qorista. Sidaas darteed waxaa loo baahan yahay in carruurta si fiican looga dhergiyo luqadda inta ay joogaan guriga ama ay ku sugan yihiin xannaanada. Mar kasta wadahalal la yeelo carruurtaada, iskuna day inaad uga jawaabto su'aal kasta oo ay kaa weydiiyaan erey iyo sababta wax kasta loogu magacaabay sida loogu yeero.

Sida aan ognahay horumarinta luqadda kuma dhammaato markay carruurta bilawdo iskuulka, ee way sii socotaa ilaa iyo inta uu qofku ka noolyahay. Sidaad awgeed si fiican ula hadal carruurtaada iskuulka dhigata, isla markaana ka faa'ideysto haddii aad hesho waqti aad carruurtaada kula ciyaari karto luqadda iyo ereyada xiisaha leh.

Waxaa jira dhawr ciyaarood oo xiiso leh oo sare u qaadaya ama dhiirigalinaya horumarka luqadda carruurta.

U aqri carruurta buuggaag

Wax u akhri carruurtaada ayagoo la socda ama fiirinaya meesha aad akhrineyso. Kalana hadal ilmaha buugga wuxuu ku saabsan yahay iyo ereyada cusub ee lala kulmo. Waayo ilmaha yar ee ku barbaara dhageysiga sheekooyinka, waxay noqdaan kuwo caadi ay u noqoto waxyaalaha qoran intay yaryihiinba. Taasna waxay keenaysaa inaysan wax badan ku qaadan bilaabidda wax akhriska iyo inay si qoraal ah ku soo bandhigaan fikir kooda. Waxaana xusid mudan inaan la hilmaamin in xitaa carruurta waaweyn ay ka helaan dhageysiga waxa loo aqrinayo. Waxaana laga yaabaa inay sidaas u noqoto qaab raaxo leh oo carruur badan u keena xasilooni iyo degganaan.

...Isla akhriya adiga iyo carruurtaa

Markii aad adiga iyo carruurtaada wax isla akhrineysaan, ka yeel wax wada akhriskaas mid qosol iyo xiiso badan leh oo carruurta ay ka helayaan adigoo aan wax culeys ah saarayn carruurta. Waxaad sameyn kartaan in qofba markiisa uu akhriyo laakiin waligaa noqo mid u dhega nugul markii carruurtaadu u arkaan in wax akhrisku dhibayo.

Si wax akhrintu u noqoto mid xiiso leh carruurtuna ay ka helayaan waa inaad ka ambaqaadaa ama tixgalin siisaa waxa uu ilmahaagu daneynayo ama jecel yaha? Ma wuxuu jecelyahay xayawaanka? Ma wuxuu jecelyahay buugaagta carruurta? Ma wuxuu jecel yahay kubadda cagta?

La yeelo iskuulka wada shaqeyn

Waalid ahaan waxaa muhiim kuu ah inaad fahamto habka waxbarasho uu iskuulku isticmaalo. Isku day inaad booqato iskuulka si aad uga hesho fikrado ku anfaca. Weydii macallinka qalabka waxbarasho ay isticmaalaan, leyliyada ay ilamaha ku tababaraan iyo qaababka ay isticmaalaan.

Weydiiso macallinka fikrado iyo talo la mid ah kuwa iskuulku isticmaalo oo aad adigu xitaa guriga kula isticmaali karto carruurtaada. Badanaa waxaad u baahan tahay fikrado ama habab aan sidaan u dhib badneyn isticmaalkooda. Waxaaba laga yaabaa in warqad iyo qalin ay kugu filan yihiin. Qasabna ma ah in qofku uu fadhiisto miis markuu ka shaqeynayo waxyaalo la xiriira barashada luqadda! Waxaaba fikrad fiican ah inaad xarfaha ama alfabeetada ku dhajiso meel ay carruurta arkayso sida firintijeerka ama tallaajadda, isla halkaasna aad ka siiso tababarka xarfaha ama aad ku barto dhisidda erayo cusub.

”Waxaa dhaqan ama xeer fiican ah in carruurta iskuulkana wax ka soo bartaan gurigana lagu siiyo tababar waxay soo barten”. Waayo waajibka in carruurta hab wanaagsan wax loo baro wuxuu saaran yahay iskuulka, oo ah meesha ay ku qaataan casharadooda ayna ku bartaan waxyaalo cusub. Markaas ka dibna way habboon tahay inay guriga ku sii tababartaan. Caawi carruurtaada, laakiin isku day inaad garato goorta uu ilamahaagu kaligiis isku filnaankaro.

Isticmaal dareemayaashaada

Bani 'aadamku wuxuu wax ku bartaa dareemayaashiisa- asagoo adeegsanayo waxa la leeyahay, ama la maqlayo, ama la arko ama la dareemayo urkooda. Qaar ka mid carruurta waxay ka helaan markay waxbaranayaan inay heystaan buug, qaar kale waxay ka helaan inay ka shaqeeyaan waxyaalo muuqda oo la taabankaro ayagoo isticmaalaya farahooda ama isticmaalaya shey sida dhoobo, birlab, qoryo iwm. Waxaan kaloo carruurtaada ku tababari kartaa heeso iyo muusik.

Isticmaal kombiyuuterka

Isticmaalka kombiyuuterka waa kaalmo weyn. Carruur badan waxay halgan ugu jiraan qoraalka gacanta ah oo way hilmaamaan higgaaadda. Xusuuso in qoraal kasta uu noqdo mid la aqrin karo marka kombiyuuterka lagu qoro.

Waxaa jira dhawr barnaamij oo lagu tababarankaro qoraalka, ayna la socoto dhawaaq iyo sawiro.

Waxaa jira xitaa kombiyuutaro cod wax akhriya leh, oo kuu akhrinkara qoraalka ku qoran shaashadda kombiyuuterka iyo kuwo kale oo la adeegsankaro.

U dhaaf ilmaha inay dhagaystaan buuggaag la aqrinayo

Ilmaha wax akhrintoodu aysan sal yeelan oo jajabinaya wax akhriska waxaa ku habboon, si ay ku bartaan wax akhrin wanaagsan, inay isticmaalaan buugaagta la dhegeysan karo ee duuban. Carruur badan ee dhigata iskuulka si ay wax ku bartaan waxaa caawinkara inay dhegeystaan buuggii oo duuban oo markaa ay dhagaha wax ka aqriyaan.

Isticmaal wax xusuusta kaalmeeya

Waalidku wuxuu sameynkaraa, si uu ugu sahlo carruurtiisa dhibaataada ka heysata xusuus xumida, in waxyaalaha muhiimka ah ay cajalad ugu duubaan ama qalabka kale ee wax lagu duubankaro ee casriga ah. Ilmuhu waxay taas xitaa u isticmaalikaraan inay farriinta ay iskuulka iyo guriga u soo kala gudbinayaan inay duubaan si ay ugu sahlanaato xusuusashada, tusaale ahaan in uu soo qaato dharkiisa ciyaaraha ama bacdiisa cuntada iwm.

Ku tababar carruurta xisaabta ciyaar ahaan

Xisaabtu waa maaddo carruurta badankeed ay dhib ku qabaan, taasna waxaa badanaa sabab u ah in xisaabta fahamkeedu ku dhisan yahay inaad si sax ah u akhriso qoraalka. Bal ka fakir adigu qoraalada faraha badan ee buugga xisaabta ku qoran ee ardayga laga doonayo inuu garto ama xalliyo.

Waxaa xitaa carruur badan ku adag inay kor ka bartaan jadwalka isku dhufashada. Hase yeeshee waxa jira qaabab wax tirin ee carruurta u sahlaya inay xusuustaan jadwalka iskudhifashada. Waxaa habboon in la adeegsado xisaabiyaha. Marka carruurta baranayso saacadda waxaa la adeegsadaa xisaabta: nus saac wuxuu ka koban yahay laba rubuc ama lix meelood oo min shan daqiiqo ah.

Ka taxadar rabitaanka carruurta

Waalidku waa inuu diyaar u noqdaa inuu beddelo howl kasta ama ciyaar kasta si ku habboon carruurtiisa. Waalidku waa inuu xusuusnaado inuu ammaano carruurta haddii xitaa horumarkiisu uu yar yahay, waayo ammaantu waa mid waxtar weyn u leh carruurta. Waalidka waa inuu bartaa qaab kasta ama xeelad kasta oo carruurtiisu isticmaasho kolkay wax baranayaan si uusan ugu qasbanaan inuu shaqadii dib u soo bilaabo. Waana inaad si feejigan ugu kuurgashaa hab u dhaqanka carruurta si aad uga hortagto khilaaf aan loo baahneyn inuu idinka dhex dhaco.

Habeynta iyo qorsheynta

Carruurta badankood waxay u baahan yihiin inuu waalidkooda ka caawiyo sidii ay u bilaabi lahaayeen howlaha gaarka ah ee iskuulku ka doonayo, waayo carruurta badankood waxaa ku adag inay qorsheeyaan isla markaana isku hagaajiyaan shaqadooda. Sidaas darteed waa inaad ka caawisaa inay samaystaan qorshe ah in wax kasta qaab isku xiga ay u sameeyaan, waayo adiguba way kugu adkaan kartaa in aad buugaagtii la rabay ama wixii saxa ahaa aad boorsada ugu riddo, carruurtuse caawinaad la'aan umaba suurageleyso inay taa sameeyaan.




ILLUSTRATION: CHARLOTTE HEDBERG

Qof kastaa waa uu gaarikaraa hadafkiisa.

Markii qofka ay haysato dhibaato la xiriirta wax akhriska iyo wax qorista, wuxuu qaadaa tallaabo kasta oo uu kaga bixikaro dhibkaas – waana inuu sameeyaa siduu hadafkiisa ku gaari karo. Hadduu qofku jid toosan ku gaari kari waayo ujeeddadu lahaa wuxuu u soo marayaa laalaab.

Wuxuuna qofku gaarayaa hadafkiisii isagoo leh khibrad badan oo u soo korortay intuu ku soo jirey waddada gaarista hadafkiisa.

Warbixin dheeraad ah

Qoraalkaan waxaa soo saaray ururka aan faa'ido doonka aheyn ee lagu magacaabo Kod-Knäckarna. Waxaana jira CD loogu talo galay in waalidka, carruurta qabta dhibaataada wax akhrin- iyo qoris la'aanta iyo disleksiyada, ay wax ka bartaan. Waxaad kaloo ururkaas warbixintiisa iyo mashaariicdiisa ka akhrisankartaa bogga internetka www.kodknackarna.se.

Macluumaad iyo talooyin ku saabsan koritaanka luqadda

caruurta waxaad ka heleysaan www.blom.just.nu

FDB, ururka waalidiinta ay caruurtooda ku adag tahay qorista iyo aqriska.
www.fdb.nu

talefoon +46 (0)8- 612 06 56.

Dyslexiförbundet FMLS, ururka dadka ku adag qorista iyo aqriska.

www.dyslexiforbundet.se

talefoon +46 (0)08-665 17 00.

Swedish Dyslexia Association, waa ururka kuwa ka shaqeeya maadooyinka hoos yimaada aqriska iyo qoriska iyo dadka kale ee xiiseeya maadadan.

www.ki.se/dyslexi

talefoon +46 (0)08-524 868 25.



BDA, British Dyslexia Association. www.bdadyslexia.org.uk

IDA, International Dyslexia Association oo fadhigiisu yahay USA
www.interdys.org

Qoraal talo siin ah

Andersson B, Belfrage L, Sjölund E (2006). *Smart start vid lässvårigheter och dyslexi*. Natur och kultur.

Barnens bokklubb (2007). *Boken om läsning*.

Lundberg I (2006). *Konsten att läsa faktatexter*.

Natur och kultur.

Lundberg I (2006). *Alla kan lära sig läsa och skriva*.

Natur och kultur.

Läsk pärmen (2007). FDB.

Seth I, Heimdal S & Janson E (1997). *Dyslexi för föräldrar*.

Informationsförlaget.

Stadler E (1994). *Dyslexi. En introduktion*. Studentlitteratur.

Filin

En värld av möjligheter (2002). FDB.

Tidigt fokus på läsutveckling – för barn med lässvårigheter och dyslexi (2007).

Kod-Knäckarna.

Qoraalka waalidka- waa ilaha carruurta ka hesho aqoonta, waxaa horumariyey ururka Kod-Knäckarna ayagoo kaashanaya shirkadda Bodil Andersson Rack, Spella AB

Soo saaridda qoraalkaan waxaa maalgeliyay
Stiftelsen Riksbankens Jubileumsfond iyo kuwo kale

Sawirrada: Ian Smythe, IBIS Ltd.
Carruurta sawirkoodu ku jiro qoraalkaan wax xiriir ah lama laha mowduuca qoraalka ku saabsan yahay

© 2009 KOD-KNÄCKARNA

WWW.KODKNACKARNA.SE

ISBN 978-91-977781-5-2